KU DHAQAN XAFIIS DAWLADEED

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad — Muqdisho, 1° Jennayo 1975 — L. 1

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yai waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 1, Tr. 6 Diseembre 1974 — *Nidaaminta Maamulka Hawlaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Madaxtooyada.* Bog. 3

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA ,6 Diseembre 1974, L. 1 — *Magacaabid Guddiyaal G. S. K.* » 9

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Diseembre 1974, L. 2 — *La-Taliyeyaasha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.* » 11

## BOGGA SEDDEXAAD

W. M.

Madbacada Dwladda — Muqdisho

# BOGGA KOWAAD
# S H A R C I

SHARCI L. 1, Tr. 6 Dishembre 1974.
Nidaamintа Maamulka Hawlaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Madaxtooyada

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Baahida loo qabo in laga dhiso guddiyo Golaha Sare ee Kacaanka;

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka fadhigoodii 5 Diseember 1974.

WUXUU GUDDOOMIYEY

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Dhismo Guddiyaal G. S. K.*

1. Si loo qorsheeyo la iskuna duwo hawlaha kala geddisan ee Golaha Sare ee Kacaanka (G.S.K.), Waxaa la dhisayaa Guddiyaal raacsanaandoona G.S.K. oo kala ah:

b) Guddiga Siyaasadda;

t) Guddiga Bulshada;

j) Guddiga Dhaqaalaha;

x) Guddiga Cadaaladda iyo Sharciga;

kh) Guddiga Nabadgelyada iyo Caashaandhigga.

2. Guddiga walba wuxu ka koobnaan doonaa:

b) Rag ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka, iyo

t) La-taliyayaal aqoon iyo waayo aragnimo u leh hawsha guddiga loo xilsaaray.

Qodobka 2aad

*Ulajeeddada Dhismaha Guddiyada*

1. Ulajeeddooyinka Guddiyada loo dhisay waa:

b) In ay darsaan, qorsheeyaan, jaangooyaan dhibaatooyinka Dalka Xagga Siyaasadda, Dhaqaalaha Bulshada iyo Nabadgelyada;

t) In ay darsaan oo jaangooyaan hirgelinta habka Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan iyo mabaadii'da Kacaanka;

j) In ay hubsadaan oo ilaaliyaan Sharciga Dalka iyo Fulinta go'aannada Golaha Sare ee Kacaanka iyo Dowladda;

2. Sida ku cad qodobbada sharcigaan waa in Guddiyadu ku shaqeeyaan habka wada Tashiga Wadareed.

Qodobka 3aad

*Habka Magacaabidda*

Guddoomiyayaasha, xubnaha iyo La-taliyayaasha Guddiyada waxaa lagu magacaabaya go'aan ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 4aad

*Guddiga Siyaasadda*

1. Guddiga waxaa guud ahaan loo xilsaaray inuu si joogta ah u darso, u qorsheeyo, ee u jaangooyo arrimaha Siyaasadda ee Dalka, gaar ahaan kuwa saameeynaya:

b) Hanuuninta, kicinta, iskuduwidda iyo sare u qaadka garashada Siyaasadda dadweynaha, shaqaalaha, dhallinyarada, haweenka iyo Guulwadayaasha;

t) Ururinta hawl karnimada Hantiwadaagga (Attivisti ee quadri);

j) Dhismaha Dugsiyada Tababaridda muddada gaaban iyo tan dheree ee Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan, qoridda mabda'a Hantiwadaagga iyo hirgelinta Siyaasadda Kacaanka;

x) Ku Faafinta mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan shaqaalha Dawladda, Dadweynaha, iyo Ciidammada Qalabka sida;

kh) Habeynta iyo talo bixinta Sharciyada iyo Xeerarka lagu dhisayo Xisbiga Hantiwadaagga ayadoo la tixgelinaayo hiddaha iyo dhaqanka u gaarka ah Ummadda Soomaaliyeed;

d) La socodka Siyaasadda Arrimaha Dibedda ayadoo la tixgelinaayo danaha Ummadda Soomaaliyeed iyo waajibka wax wada qabsiga, xiriirka dhaqaalaha, kan Siyaasadda iyo xasilloonaanta.

2. Kormeeridda iyo la socodka Wasaaradaha iyo xubnaha ku lug leh Siyaasadda.

Qodobka 5aad

*Guddiga Bulshada*

Guddiga waxaa guud ahaan loo xilsaaray inuu si joogta ah u faaqido, u ilaaliyo ulana socdo arrimaha ku lug bulshada Soomaaliyeed.

Guddigu waa inuu hubiyaa socodsiinta howlaha khuseeya Bulshada iyagoo warbixin ka dhiibaya fulinta siyaasadda iyo mabaadi'da Kacaanka, ulajeeddooyinka Hantiwadaagga iyo danaha bulshada, gaar ahaan kuwa saameynaya:

b) Warfaafinta, hiddaha dhaqanka iyo cilmiga, waxbarashada, qoridda buugaagta, faafinta iyo xoogeynta ciyaaraha iyo isboortiga, daryeelidda iyo ilaalinta caafimaadka Ummadda;

t) Uruurinta iyo qoritaanka taariikhda Ummadda iyo Maamulka shaqooyinka Gobollada, Degmooyinka, Tuulayaasha; Kormeeridda, baarista iyo la socodka Wasaaradaha iyo Wakaaladaha la xiriira.

Qodobka 6aad

*Guddiga Dhaqaalaha*

1. Guddiga waxaa guud ahaan loo xilsaaray inuu si joogta ah u darso, u qorsheeyo, ee u jaangooyo horumarinta dhaqaalaha Dalka, iyagoo tixgelinaya mabaadi'da Hantiwadaagga iyo ulajeedooyinka Kacaanka sida ku tilmaaman xaashida 1aad iyo ta 2aa ee Kacaanka.

2. Gaar ahaan Guddigu wuxuu ku shaqa leeyahay:

b) Horumarinta dhaqaalaha waddanka;

t) Talo bixinta ku saabsan maamulka iyo horukaca dhaqaalaha, horumarinta beeraha, warshadaynta, xannaanada xoolaha; soo saaridda khayraadka badda; dejinta iyo barwaaqaynta reer miyiga; hubinta iyo fulinta qorshaynta sannad-kasta ee loo dhigay Dalka guud ahaan iyo tan loogu talo galay Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka.

3. Kormeeridda, baarista iyo la socodka Wasaaradaha iyo Wakaaladaha ku lug leh dhaqaalaha iyo warshadaha iyo Ganacsiga Madaxa bannaan ee Dalka.

Qodobka 7aad

*Guddiga Caddaaladda iyo Sharciga*

1. Guddiga waxaa loo xilsaaray inuu si joogta ah ula socdo arrimaha ku lug leh caddaaladda, garsoorka iyo sharci dejinta Dalka. Gaar ahaan Guddigu waa inuu baaraa talana ka bixiyaa maamulka garsoorka fulinta iyo ilaalinta sharciyada Dalka iyo qawaaniinta shareecada.

2. Guddigu wuxuu isla markaas shaqo ku leeyahay baabi'inta qabyaaladda, ciribtirka eexashada, qaraabo kiilka, iyo musuq-maasuqa si kastaba ha ku yimaadee.

3. Kormeeridda, baarista iyo la socodka Wasaaradaha iyo hay' adaha kale ee ku lug leh caddaaladda.

### Qodobka 8aad

*Guddiga Nabadgelyada iyo Gaashaandhigga*

Guuddiga Nabargelyada hawshiisu waxay ka kooban tahay:

b) Ilaalinta Nabadgelyada iyo Badbaadada Ummadda, Daafaca Dalka gudihiisa iyo xuduuddiisa;

t) Faaqidaadda iyo talo bixinta amuuraha loo soo gudbiyo ee saamaynaaya nabadgelyada Ummadda;

j) Baarista dhibaatooyinka dhalin kara xiisad ama khatar ku noqon kara xasilloonida Ummadda;

x) Warbixinta iyo soo hordhigga G.S.K. arrimaha kediska ah ee ku yimaadda Dalka kuna lug leh shaqadooda.

### Qodobka 9aad

*Awoodda Guddiyada*

1. Guddi waliba awood buu u leeyahay inuu wixii tallaabooyin ah ee loo baahanyahay qodobbada sharcigana waafaaasan qaado si u fuliyo howsha loo xilsaaray, asagoo kala tashanaya Xoghayayaasha Dawladda oo mas'uulka ka ah.

2. Gaar ahaan, Guddi kastana wuu baari karaa ama xaqiijin karaa in mas'uuliyadda loo dhiibay Wasaaradaha iyo Wakaaladaha si fiican loo fulinayo. Haddii gefaf ama maamul xumo dhacdo, Guddigu tallaabooyin ayuu ka qaadi karaa madaxda ku shaqada leh, hase yeeshee haddii madaxda lagu eedeynayo inay xilkooda ka soo bixi waayeen ay ka mid yihiin Xoghaye, Madaxda Ciidammada, Agaasime Guud, Danjire ama Guddoomiye Gobol waa in Guddigu arrimahooda soo hordhigaan Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka iyagoo qoran.

### Qodobka 10aad

*Xubnaha Gudiyada*

1. Guddi waliba waxay yeelan doontaa Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo Xoghaye. Guddoomiyaha waxaa dooranaya G.S.K., Guddoomiye Ku-xigeenka iyo Xoghayaha waxaa magacaabi doona Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, isagoo dhegeystay talada Guddoomiyaha Guddiga.

2. Guddoomiyahu wuxuu madax ka yahay guddiga, wuxuuna guddoonshe ka noqon doonaa fadhiyada guddiga, habeynta maamulka iyo

socodsiinta hawlaha guddiga. Haddii Guddoomiyaha Guddiigu uu xanuunsado ama ay jirto sabab uu kaga maqnaado shirka howshii Guddoomiyaha waxaa qaban doona Guddoomiye Kuxigeenka Guddiga.

3. Haddii loo baahdo guddi kastaa wuxuu yeelan karaa guddiyo hoose ee loo xilsaaro arrimo gaar ah.

Qodobka 11aad

*Habka Maamulka Shaqada*

1. Guddi kastaa waa inuu fadhi joogta ah yeeshaa ugu yaraan toddobaadkiiba mar. Haddii se ay amuuro kedis ahi yimaaddaan guddiga ay markaa amuurtu khusaysaa wuxuu yeelan karaa fadhi deg deg ah oo uu isugu yeero Guddoomiyuhu, ama Guddoomiye Ku-xigeenkiisu.

2. Fadhiyada Guddiyada waa inay joogaan ugu yaraan 2/3 tirada Guddiga.

3. Guddi kastaa waa inuu u gudbiyaa Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka go'aanada iyo warbixinta ay sameeyaan iyagoo qoran oo ay saxeexaan Guddoomiyaha iyo xubnaha ka qayb galay fadhiga.

4. Warbixinta iyo go'aannada waa in la hordhigaa Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 12aad

*Kaaliyaha Madaxweynaha G. S. K.*

1. Si loo nidaamiyo loona habeeyo maamulka iyo Agaasinka Guud ee Madaxtooyada G. S. K., waxaa la dhisayaa jago cusub ee loo aqoonsan doono Kaaliyaha Madaxweynaha G. S. K.

2. Kaaliyaha waxaa magacaabi doona Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 13aad

*Hawsha Kaaliyaha*

1. Kaaliyaha waxaa loo xilsaaray inuu:

i) Xoghaye ka noqdo fadhiyada Golaha Sare ee Kacaanka;

ii) Xiriiriyo Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka iyo Madaxweynaha G. S. K.

iii) Qabto oo fuliyo hadba hawshii u khaas ah ee Madaxweynahu u dhiibto.

2. Kaaliyaha waxaa hoos imaanaya waaxaha soo socda:

i) Xoghaynta Golaha Xoghayayaasha;

ii) Waaxda Maamuska iyo soo dhaweynta M.G.S.K.;

iii) Waaxda Tarjumada iyo wararka M.G.S.K.;

iv) Maamulka ilaalinta iyo xannaanada Guryaha Maamuska ee hoos yimaadda Madaxtooyada G.S.K.

### Qodobka 14aad

*Heerar Hoose*

Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo dhegeystay Guddoomiyayaasha wuxuu soo saari doonaa xeerar hoose ee lagu faahfaahinayo sharcigaan.

### Qodobka 15aad

*Baabi'inta Sharciyadii Hore*

Wixii sharci ama xeer ah ee ka soo horjeeda ama aan la soconin sharcigan waa la baaba'shay.

### Qodobka 16aad

*Dhaqan Galka*

Sharcigani wuxuu dhaqan galay 6dii Diseembar 1974, waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 6-12-1974.

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
Madaxweynaha G.S.K.

# BOGGA KOWAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAAEANKA
Tr. 6 Dishembre 1974, L. 1.
Magacaabid Guddiyaal G. S. K.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidda 1aa iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga Lam. yahay 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambar. yahay 1 taariikh 6 Diseembar 1974 ee lagu dhisay Guddiyaalka G.S.K. iyo jagada Kaaliyaha Madaxweynaha G.S.K.

ISAGOO TIXGELINAYA Qodobka 1aad, kan 3aad iyo kan 12aad ee Sharciga Lamb. kor lagu tilmaamay;

ISAGOO ARKAY Go'aanka Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

*Magacaabid Xubnaha Guddiyada G.S.K.*

Guddiyada lagu dhisay Sharciga lambar. yahay 1 ee soo baxay 6 Diseembar 1974, waxay ka koobnaan doonaan ragga hoos ku magacaaban:

GUDDIGA SIYAASADDA

Jaalle G. Sare Ismaaciil Cali Abokor — Guddoomiye
Jaalle G. Dhexe Cabdulqaadir Xaaji Maxamed — Xubin
Jaalle Dr. Maxamed Aadan Sheekh — La-taliye

GUDDIGA BULSHADA

Jaalle G. Dhexe Cabdirisaaq Maxamed Abuukar — Guddoomiye
Jaalle G. Dhexe Cabdi Warsame Isaaq — Xubin
Jaalle G. Dhexe Maxamed Cumar Jees — Xubin

## GUDDIGA DHAQAALAHA

| | |
|---|---|
| Jaalle S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax | — Guddoomiye |
| Jaalle G. Sare Maxamed Cali Shire | — Xubin |
| Jaalle G. Sare Faarax Wacays Duule | — Xubin |
| Jaalle G. Sare Axmed Xasan Muuse | — Xubin |
| Jaalle G. Dhexe Cismaan Maxamed Jeelle | — Xubin |
| Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Weyrax | — La-taliye |
| Jaalle Dr. Maxamed Warsame Cali (Kimiko) | — La-taliye |
| Jaalle Dr. Ibraahim Meygaag Samantar | — La-taliye |
| Jaalle Dr. Cumar Saalax Axmed | — La-taliye |

## GUDDIGA CADAALADDA IYO SHARCIGA

| | |
|---|---|
| Jaalle G. Sare Cali Mattan Xaashi | — Guddoomiye |
| Jaalle G. Sare Muuse Rabiile Good | — Xubin |
| Jaalle G. Sare Axmed Maxamuud Faarax | — Xubin |
| Jaalle Dr. Cabdulcasiis Nuur Xirsi | — La-taliye |

## GUDDIGA NABADGELYADA

| | |
|---|---|
| Jaalle S. Gaas Maxamed Cali Samantar | — Guddoomiye |
| Jaalle S. Guuto Cabdalla Maxamed Faadil | — Xubin |
| Jaalle G. Sare Axmed Soleymaan Cabdulle | — Xubin |
| Jaalle G. Sare Maxamuud Geelle Yuusuf | — Xubin |

### Qodobka 2aad

*Kaaliyaha Madaxweynaha G.S.K.*

Waxaa loo magacaabay inuu noqdo Kaaliyaha Madaxweynaha G.S.K., Jaalle G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan.

### Qodobka 3aad

*Dhaqan Gelid*

Xeerkani wuxuu dhaqan galay 6dii Diseembar 1974, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, li 6-12-1974.

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Madaxweynaha G.S.K.

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanta lamb. 1, bogga lab. 5.*
*Muqdisho, 9 Jennayo 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAAEANKA**
**Tr. 6 Dishembre 1974, L. 2.**
**La-Taliyeyaasha Guddiyada Golaha Sare ee Kacaanka.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan labaad ee Kacaankaa iyo Sharciga L. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lamb. yahay 1 taarrikh. 6-12-1974 ee lagu dhisay Guddiyaal G.S.K. iyo rag La-Taliyayaal ah.

ISAGOO ARKAY Dekreetada lamb. yahay 1 taarrikh. 6-12-1974 ee lagu magacaabay La-Taliyayaasha Guddiyada G.S.K.

ISAGOO AGOONSAN Baahida loo qabo in la xaddado gunnada hawsha iyo ka guriga ay xaq u leeyihiin ragga La-Taliyayaasha ah.

ISAGOO ARKAY Go'aanka G.S.K.

WUXUU SOO SAARAY:

XEERKA

Qodobka 1aad

La-Taliyayaasha Guddiyada G.S.K. ee lagu magacaabay Dekretada lambarkeedu yahay 1 Taariikh. 6-12-1974 waxay qaadan doonaan gunnada (Indennità) hoos lagu xaddaday:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| a) | Gunnada hawsha | Shs. | So. | 2500 |
| b) | Gunnada guriga | » | » | 1000 |

Qodobka 2aad

La-Taliyayaashu waxay lacagta ka qaadan doonaan Xafiiska Agaasinka Guud lacagta ee Madaxtooyada G.S.K.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markii la saxiixo waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 6-12-1974.

*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
Madaxweynaha G.S.K.

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 6.*
*Muqdisho, 9 Jennayo 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

KU DHAQAN XAFIIS D.

# *Faafin Rasmi ah*

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Muqdisho, 11 Jenayo 1975 **L. 1 R. 1**

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 2, Tr. 14 Diceembre 1974 — *Wax ka beddelid Sharciga lagu dhisay Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.* Bog. 16

SHARCI L. 3, Tr. 5 Jenayo 1975 — *Toosin Qodobka 7aad ee Sharciga L. 17 ee soo baxay 21kii Aprile 1974.* » 17

SHARCI L. 4, Tr. 5 Jenayo 1975 — *Wareejinta Xidhmooyinka Qaranka.* » 18

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 7 Diseembar 1974, L. 3 — *Xubinta Guddi Degmo.* Bog. 19

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 7 Diseembar 1974, L. 4 — *Maamul Tuulooyin.* » 20

Madbacada Dwladda — Muqdisho